

## **Xeer Ra'isul Wasaaraha lamba. 151 ee 17 Agoosto 1967**

### **Magaabista Golaha Baarista ee Wakaaladda Dekedaha**

#### **RAI'SUL WASIIRKA**

Kadib markii la arkay qodobka 83 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 iyo wax ka bedelidii is xig xiggay;

Kadib markii la arkay qod. 1 ee DL lamba. 5 ee 16 Agoosto 1966 ku bedelida Sharci lamba. 19 ee 10 Disember 1966 oo la xiriira howlaha Wakaaladaha Dowliga ah;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la dhiso Guddigi ujeedadiidu yahay in la baaro howlaha adeegyada Wakaaladda Dekedda;

Kadib markii la dhegeystay aragtida Wasiirka Isgarsiinta iyo Gadiidka.

#### **WAXAA LA SOO SAARAY**

##### **Qod. 1**

1. Waxaa la dhisay Guddiga baarista la xisabtanka Wakaaladda Dekedaha
2. — Guddiga wuxuu ka koobnaan doonaan:
  1. Mud. Omar Abdi Ali — Guddomiye;
  2. Mud. Mohiddin Hassan Yebero — Xubin;
  3. Dr. Mohamed Awad Bukari — Xubin;
  4. Mud. Ahmed Musse Gheedi — Xubin.

##### **Qod. 2**

1. Ujeeddada Guddiga waxaa ka mid ah in uu baaro, caddeyo soona kormeero la xisaabtanka iyo wixii kale oo loo baahdo;
2. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in baaro qorallada maamulka, in uu weydiiyo macluumaad kasto oo isleeyahay waa loo baahan yahay ee la xiriira howlaha Dekedda;
3. Guddigu wuxuu u qori doona Rai'sul Wasaaraha warbixin oo iska leh awooda in uu soo saaro talaaboyin ku haboon si loo hirgeliyo howlaha.

##### **Qod. 3**

Guddigu wuxuu hirgeli doonaa 20 Agoosto 1967.

##### **Qod. 4**

Dekretadan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga.

##### **Qod. 5**

Waxaa laga noqday Dekreetada Ra'siul Wasaaradaha lamba. 238 ee 15 Oktoober 1966.

Muqdisho, 17 Agoosto 1967.

Rai'sul Wasaaraha

**Mohamed Haji Ibrahim Egal**